



Ku soo Dhawoow Bukaansocodka Hidderaaca ee Isbitaalka Carruurta

Maxaad ka filan kartaa booqashada caadiga ah?

Dhakhtarka ama kalkaalisada sare ayaa ku weydiin doona sababta aad u timid Bukaansocodka Hidderaaca. Waxaa la eegi doonaa daawooyinka ilmahaaga, taariikhdiisii hore ee caafimaadka iyo wixii su'aalo ah oo aad qabto. Inta aadan ballantaada imaan ayaa la sii eegi doonaa diiwaanka caafimaadka, laakiin waxaa laga yaabaa in uu diiwaan kala dhiman yahay oo adigaaba sheegi doona xaaladaha ilmahaaga. Dhakhtarka ama kalkaalisada sare ayaa ilmahaaga xafiiska ku wiisiteyn doona (oo waalidka iyo walaalaha haddii ay rabaan dibadda ayey qolka uga bixi karaan). Waxaa lagu sheegi doonaa natiijada wiisitada iyo wixii ah baaris sheybaar oo la idin kula talin doono. Inta ay socoto wiisitada waxaa laga yaabaa inuu idin la kulmo la-taliyaha hidderaaca, oo waxaa la idin weydiin doonaa taariikhda caafimaadka ee qoyska, waxaana la idiin sheegi doonaa baarista sheybaarka iyo natiijada, ama waxaa la idiin sheegi doonaa wixii xanuun ah oo la ogaaday.

Wakhti intee le'eg ayey qaadanaysaa ballanta caadiga ah?

Ballanta ugu horreysa badanaa waxay qaadataa 60-90 daqiiqadood. Markaad marar kale booqasho u soo noqotaan ballamuhu waxay qaadan doonaan 45-60 daqiiqadood. Ballamuhu waa ay dheeraan karaan, haddii ay jiraan waxyaabo cusub oo soo kordhay, xanuun cusub oo la helay, ama haddii turjubaan loo baahdo.

Sidee baad isugu diyaarineysaa ballamaha?

La-taliyaha hidderaaca ayaa taleefan kugula soo xiriiri kara dhowr cisho ka hor intaan aan la gaarin ballanta ilmahaaga, oo waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo ku saabsan taariikhda caafimaadka ee qoyskiinna. Adiguna wakhtiga ballanta waxaad fursad u haysataa in aad sheegto wixii faahfaahin dheeraad ah ee ku saabsan qoyskiinna.

Baarista sheybaarka

Baarista hidderaaca badankeedu waa in dhiig la iska qaado. Ceymisyada caafimaadka badankoodu waxay u baahan yihiin in oggolaansho la weydiiyo ka hor intaan la qaadin dhiigga baarista hidderaaca. Shaqaalaha isbitaalka ayaa ceymiska caafimaadka u gudbin doona waraaqaha codsiga (oo oggolaanshaha in la helo waxa uu qaadan karaa 2 ilaa 3 todobaad). Marka oggolaanshaha la helo ka dib, shaqaalaha isbitaalka ayaa kula soo xiriiri doona si ay kuugu qabtaan ballanta sheybaarka oo keliya. Natiijada baarista hidderaaca waxay qaadan kartaa dhowr todobaad ama dhowr bilood.

Mararka qaarkood kaadi ayaa laga qaadi doonaa ilmahaaga markaad keento, sidaas awgeed fadlan ogeysii shaqaalaha isbitaalka, haddii ilmahaagu musqul u baahdo, sababtoo ah waxaa laga yaabaa in looga baahdo kaadi saami ah.

Sawir-qaadid

Waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto idan si ilmahaaga looga qaado sawirro lagu lifaaqo diiwaankiisa caafimaadka. Sawir-qaadidda waad diidi kartaa.

Sawirrada jirka/Raajo

Marar aan badneyn hawlaha hidderaaca guud ahaan waxaa qeyb ka ah in la sameeyo baaris kala duwan (sida ultrasound, EKG iwm) oo noqon kara kuwa ugu habboon. Shaqaalaha bukaansocodka ayaa taleefan kugula soo xiriiri doona si ay kuugu sharxaan baarista noocaas ah. Waxaa laga yaabaa inay kol hore shaqaaluhu ballamahaas idiin sii qabtaan si ay idiinku sahlanaato markaad timaaddaan. Waxa kale oo aad filan kartaa in taleefan kale la idiinka soo diro isbitaalka carruurta si la idiinku diiwaan geliyo baarista uu ilmahaagu mari doono.

Sii-gudbin

Dhakhtarka ama kalkaalisada sare oo kale ayaa *ku talin* kara in ilmahaagu uu la kulmo dhakhaatiir kale oo haysta takhasus gaar ah (tusaale ahaan: daaweynta indhaha). Fadlan ogsoonow talada noocaas ah ma ahan “sii-gudbin,” taas oo uu ceymisku uga baahan karo dhakhtarka daaweynta guud. Fadlan la xiriir shirkadda ceymiska si aad uga ogaato, haddii ay tahay in aad sii-gudbin uga baahato dhakhtarka daaweynta guud, ama la xiriir bukaansocodka dhakhtarka daaweynta guud si aad uga codsato sii-gudbin rasmi ah.

Shabakada Isbitaalka Carruurta

Shabakadda isbitaalka carruurta (Barta macluumaadka shabakada Isbitaalka) waxaad ka heleysaa adeegyo kala duwan, sida inaad eegto diiwaanka caafimaadka ilmahaaga, inaad ballan qabsato, iyo inaad fariimo u dirto kooxda ku hawlan daryeelka caafimaadka ilmahaaga. Maanta u tag miiska soo-dhaweynta si aad isugu qorto shabakadda internetka qeybteeda adeegga bukaanka.

Arrimaha Kharashka

Haddii aad wax su'aal ah ka qabto arrimo la xiriira kharashka, fadlan la xiriir xafiiska qaabbilsan arrimaha qaansheegadka kharashka, Xafiiska kharashyada, Minneapolis 612-813-6432 ama Financial Resources office, Saint Paul 651-220-6367.

Waad ku mahadsan tahay sida aad u dooratay Isbitaalka Carruurta ee Minnesota.